

## Bayaanka PEAR

Bisha Maars 2022, Guddoomiye Inslee ayaa ku amrey hay'adaha dowladda in ay hirgeliyaan [Amarka Fulinta 22-04](#): Hirgelinta Buugg-ciyaareedka iyo Qorshaha Bayaanka Cunsuriyad-diidka ee Sinaanta U-hiiliya (PEAR) ee Gobolka Washington. Ujeeddada laga leeyahay PEAR waa in la kobciyo deegaan abuura lahaansho oo dhidibadana u aasaya dhaqanka cunsuriyad-diidka ee sinnaan u hiiliya ee loogu talagalay shaqaalaha Hay'adda Daryeelka Caafimaadka (HCA) iyo dadka aan la shaqayno iyo kuwa aan adeegno.

PEAR waa qayb ka mid ah shaqada sinnaanta caafimaadka ee HCA, taas oo ah qiyam udub-dhexaad u ah hay'adeenna. Hay'adda HCA, **sinnaanta caafimaadka waxay uga dhigan tahay in qof walba uu leeyahay fursad cadaalad ah oo uu ku noqonayo intii suuragal ah qof caafimaadqaba.**

## Qulqulka hawlaha PEAR

Qayb ka mid ah shaqadeenna PEAR waa in diiradda la saaro afar meelood, oo loo yaqaanno "khadadka adeegga/service lines" ama qulqulka-hawlaha ee PEAR:

- **Adeegyada iyo Hawlgallada Hoggaaminta:** horumarinta habdhaqannada PEAR iyo nidaamyada ee dhammaan heerarka dowlad goboleedka iyada oo la adeegsanayo daah-furnaan, horumarinta hay'adaha la xisaabtanka, hoggaamin lala qabsan karo, iyo wakiillada isbeddelka.
- **Istiraatijiyyadda Xogta iyo Ka-warbixinta:** sameynta istiraatijiyyad xogeed iyo hannaan ka warbixin oo taageeraya horumarinta hay'adaha ee PEAR ee Washington. Tani waxay gacan ka geysaneysaa xaqijinta in aan diiradda saareyno meelaha ay baahiyadu ku badan yihiin.
- **Wada-shaqeynta iyo Iskaashiyada Bulshada:** ka shaqeynta xaqijinta in bulshooyinkeenna, shaqaalaheenna, iyo la-hawlgalayaasheenna ay ka wada shaqeeyan horumarinta iyo ka warbixinta dedaallada PEAR ee Washington. Waaan dhiseynaa kheyraadyada iyo iskaashiyada HCA iyo kororka awoddha ee lagu weyneynayo codka bulshada.
- **Sinnaanta Cuddada Shaqaalaha maalgelinta dhaqanka iyo hay'adda PEAR.** Tani waxaa loola jeedaa in aannu dhisno jawa dhuun isir ahaan kala duwan oo dhaqan ahaanna waxqabad leh oo loogu talagalay shaqaalaha gobolka ee heerar kasta. Waaan abuureynaa fursado loogu talagalay qof kasta si uu naftisa oo dhan u yimaado shaqada una dareemo soo dhoweyn, in la taageero, iyo in la qiimeeyo.

## Filashooyinka shaqaalaha

Waaan nahay isbeddel horseedayaasha sinnaanta caafimaadka. Isbeddel horseede ahaan, HCA waxay ku dhiirrigelinaysaa shaqaalaha iyo hoggaanka in ay:

- Ka qaybgalaan dedaallada sinnaanta caafimaadka iyo kala duwanaanta, sinnaanta, iyo u dhammaanshaha (DEI).
- Qaataan tababarre iyo in ay ka qaybgalaan shirar/munaasabado diiradda saaraya sinnaanta caafimaadka iyo DEI.
- Bixiyaan oo ay wadaagaan kheyraadyada kooxahooda iyo saaxiibadooda.
- Ka-qaybgalaan wada-sheekaysiga ku saabsan sinnaanta caafimaadka iyo DEI.
- Bilaabaan ama sii wadaan safarkooda wacyigelinta iyo fahamka sinnaanta caafimaadka iyo DEI.

## Kooxda La-talinta Bulshada (CAT) ee PEAR

Kooldani waxay ka kooban tahay shakhsiyad iyo ururro bulsho ku saleysan oo metela inta badan bulshooyinka iyo dadka kala duwan ee Washington. Xubnaha PEAR CAT waxay door muhiim ah ka qaataan dejinta istiraatijiyyadaha sinnaanta caafimaadka ee HCA, hawlaha wada-shaqeynta bulshada, iyo wadaagista waayo-aragnimadooda shakhsiyeed/nololeed ee ku saabsan sida adeegyada iyo barnaamijyada HCA ay u saameeyaan iyo bulshadooda.

Waaan rajo wanaagsan ku sugeynaa sii wadista hirgelinta PEAR. Iyada oo loo marayo PEAR iyo dedaallada kale ee sinnaanta caafimaadka, waxaan kor-u-qaadnaa sinnaanta, cadaaladda, helidda, iyo lahaanshaha ee loogu talagalay shaqaalaha HCA iyo dadka aynu u adeegno.

Nagala soo xiriir [hcaequality@hca.wa.gov](mailto:hcaequality@hca.wa.gov) ama [booqo mareegtada HCA](#) si aad u hesho maclumaaad dheeraad ah.